NHS

# Hay’adda Caafimaadka Qaranka baaritaanka xubinta taranka dumarka

## Ku caawinta go’aan gaaristaada



| | |
|---|---|
| Waa maxay kansarka xubinta taranka dumarka? | 2 |
| Maxaa sababa kansarka xubinta taranka dumarka? | 2 |
| Waa maxay baaritaanka xubinta taranka dumarka? | 3 |
| Maxsuullada baaritaanka xubinta taranka dumarka | 6 |
| Waa maxay colposcopy? | 8 |
| Samaynta doorasho – faa’iidooyinka iyo khataraha macquulka ah ee baaritaanka xubinta taranka dumarka | 9 |
| Waa maxay calaamadaha kansarka xubinta taranka dumarka? | 10 |
| Maxaa saameeya fursadaha in la qaado kansarka xubinta taranka dumarka? | 11 |
| Maxaa ku dhacaya tijaabadayda kaddib baaritaanka? | 11 |
| Yaan kala xiriiri ayaa haddii aan qabo su’aalo? | 12 |

**Waa adiga doorashadaada haddii aad samaynayso baaritaan xubinta taranka dumarka iyo haddii kaleba. Macluumaad-sidahan ujeeddadiisu waa inuu kaa caawiyo go'aan qaadashadaada.**

## Sababtee ayay Hay'adda Caafimaadka Qaranka (NHS) u bixinaysaa baaritaan xubinta taranka dumarka?

NHS baaritaankeeda xubinta taranka dumarka waxay caawisaa ka hortagidda kansarka xubinta galmada dumarka. Waxay ka badbaadisaa in ku dhow 5,000 nafood kansarka xubinta taranka dumarka sannad kasta ee waddanka Ingiriiska.

## Maxeey tahay sababta la iigu casuumay baaritaanka xubinta taranka dumarka?

Hay'adda NHS waxay siinaysaa baaritaan xubinta taranka dumarka dhammaan dumarka da'doodu tahay 25 ilaa 49 ee 3 sano kastaba iyo dhammaan dumarka da'doodu tahay tahay 50 ilaa 64 ee 5 sano kastaba. Tani sababteedu waxaa weeye inta badan kansarada xubinta taranka dumarka waxay samaysmaan da'da 25 ilaa 64.

# Waa maxay kansarka xubinta taranka dumarka?

Kansarka xubinta taranka dumarka wuxuu yimaadaa markii unugyada afka minka ay u koraan qaab aan habaysnayn ayna dhisanto iyadoo samaynaysa buurnaan (sidoo kale loogu yeero kuus - tumour). Markii tumour-ku koroba, unugyadu waxay markiiba ku faafayaan qaybaha kale ee jirka iyagoo noqonaya kuwa nolosha khatar gelinaya.

Afka minkaagu waa qaybta ugu hoosaysa ee minkaaga (ama loogu yeero womb), iyadoo ku taala dusha sare ee xubinta taranka.


# Maxaa sababa kansarka xubinta taranka dumarka?

Ku dhawaad dhammaan kansarada xubinta galmada dumarka waxaa sababa nooc fayruus lagu magacaabo fayruus galmeed-gale (human papillomavirus (ama loo soo gaabiyo HPV).

HPV waa fayruus guud – dadka inta badan wuu ku dhacaa waqti ka mid ah noloshooda. Waxaa la isugu gudbin karaa nooc kasta oo hawl galmo ah oo lala yeesho nin ama naag. Waxaa jira noocyo badan oo kala duwan ee HPV, laakiin qaar ka mid ah ayaa kaliya keena kansarka.

Noocyada HPV ee keena kansarka xubinta taranka dumarka waxay haleeli karaan afka minka iyagoo aan sababin wax calaamo ah gebi ahaanba. Inta badan kiisaska, qaabka difaaca jirkaaga ayaa iska saari kara fayruuska adigoo aan weligaa ogaan inaad qaaday. Laakiin mararka qaarkood, HPV jirooyinkiisa waxay ku keeni karaan in unugyada afka minkaaga ay noqdaan kuwo aan caadi ahayn.

Caadiyan, jirkaagu wuu iska saari karaa unugyada aan caadiga ahayn iyadoo afka minkaaga ay caadi ku soo laabanayso. Laakiin mararka qaarkood tani ma dhacdo, iyadoo unugyada aan caadiga ahayn ay samaysmaan iskuna badalaan kansar.




## Waa maxay baadhitaanka xubinta taranka dumarka?

Baadhitaanka xubinta taranka dumarka (taasoo loogu yeeri jiray ‘baaritaanka dheecaanka -smear test’) waxay ku saabsan tahay qaaditaanka waxoogaa qayb unugyo ka yimid dusha sare ee afka minka. Qaybtaas ayaa loo diraa shaybaarka laguna baaraa mikroskoob si loo eego haddii ay jiraan wax unugyo aan caadi ahayn. Unugyada aan caadiga ahayn ma ahan kansar, laakiin waxay isku badali karaan kansar haddii aan la daawayn.

Iyadoo ku xiran maxsuulka baaritaankaaga, qaybta dheecaankaaga waxaa laga baari karaa noocyada human papillomavirus (HPV) kaasoo keeni kara kansarka xubinta taranka dumarka.

Tallaabada ku xigtana waxaa lagu siin karaa baaritaan kale (lagu magacaabo colposcopy) si loogu eego afka minkaaga si aad u dheeraad ah. Haddii qofka samaynaya baaritaanka colposcopy uu helo unugyo aan caadi ahayn, waxay soo jeedinayaan in unugyadaas lagaa saaro, caadiyan marka la sameeyo baaritaan colposcopy kale. Tani waa qaabka baaritaanku uga hortagi karo kansarka xubinta taranka dumarka.

## Maxaa dhacaya haddii aan xusho inaan baaritaan helo?

**Ka hor ballaantaada:**

Baaritaanka Xubinta galmada dumarka waxaa caadiyan sameeya qof dumar ah ama dhakhtar. Haddii aad doonayso in qof dumar ah ay samayso baaritaankaaga, waxaad tan waydiisan kartaa markii aad ballanta samaysanayso.

Ballantaadu waa inay ku aaddan tahay maalinta aadan lahayn wax dhiig caado ah. Haddii aadan helin dhiigga caadada, waxaa lagu baari karaa waqti kasta.

Xirashada goono aan-ku-dhaganayn (halkii laga xiran lahaa sarwaal ama goono ku dheggan) waxay fududaynaysaa in diyaar loo ahaado markiiba baaritaanka. Fadlan ha isticmaalin daawo xubinta taranka ah, saliido ama kareemooyin 2 maalmood ka hor maalinta aad baaritaanka leedahay sababtoo ah waxay saamayn karaan qaybta dheecaanka ee kalkaaliyahaaga ama dhakhtarkaagu qaadayo.

Fadlan kala hadal kalkaaliyahaaga caafimaad ama dhakhtarkaaga haddii aad uur leedahau, haddii aad qabtay hysterectomy, ama haddii ay jiraan wax sabab ah oo aad u malaynayso inay adkaynayso inaad lagugu sameeyo baaritaan xubinta galmada dumarka. Waxay ka jawaabi karaan wixii su'aalo ama walaac aad qabi karto, iyagoo kuu samaynaya habaynta kuugu haboon adiga.

**Waqtiga ballantaada:**

Kalkaaliye caafimaad ama dhakhtar ayaa ku waydiinaya inaad dharka ka faydo goobta taranka oo seexato sariir iyadoo lugahaagu u qaloocaan kor oo kala durugsan yihiin.


Qalab lagu magacaabo speculum ayaan la galinayaa xubinta taranka iyadoo si tartiib ah u furaysa. Tani waxay u oggolaanaysaa kalkaaliyaha ama dhakhtarka inuu eego afka minkaaga.

Waxay kaddib isticmaalayaan buraash yar si qaar dheecaan ah looga qaado dusha afka minkaaga. Baaritaanka wuxuu qaadanayaa kaliya hal daqiiqo ama laba. Guud ahaan ballantu waxay qaadanaysaa qiyaastii 10 daqiiqo.

## Maxay samaynta baaritaanka xubinta taranka dumarka dareen ahaan la mid tahay?

Waxaan dareemi kartaa waxoogaa aan haboonayn, laakiin tani markiiba way kaa tagaysaa. Haddii ay xanuun tahay, u sheeg kalkaalisada ama dhakhtarka iyagoon isku dayaya inay kaaga dhigaan mid kugu haboon.

# Samaynta baaritaanka xubinta taranka dumarka



# Maxsuullada baaritaanka xubinta taranka dumarka

Waxaad helaysaa warqad laguugu sheegayo maxsuulkaaga gudaha 2 usbuuc ee baaritaankaaga.

## Inta badan dumarka waxay helaan maxsuul caadi ah

In ka ah 100 haween ah ee lagu sameeyay baaritaanka xubinta taranka, qiyaastii 94 waxay helaan maxsuul caadi ah. Haddii aad hesho maxsuul caadi ah, waxaad qabtaa khatar aad u hoosaysa inaad qaado kansarka xubinta taranka dumarka kaddib baaritaankaaga xiga.

## Qaar dumarka ah waxaa ku jira unugyo aan caadi ahayn qaybta dheecaankooda

In ka ah 100 haween ah ee lagu sameeyay baaritaanka xubinta taranka, qiyaastii 6 waxaa ku jira unuguyo aan caadi ahayn qaybta dheecaankooda. Unugyada aan caadiga ahayn ma ahan kansar, laakiin mararka qaar waxay isku rogaan kansar haddii aan la daawayn.

### Waxoogaa unugyo aan caadi ahayn

Inta badan dumarka qaba unugyo aan caadi ahayn waxay leeyihiin waxoogaa unugyo aan caadi ahayn kaliya. Waxaa jira laba nooc oo waxoogaa unugyo aan caadi ahayn ah, kuwaas oo loo yaqaan isbedellada khadka-xadka iyo heer-hoose dyskaryosis.

Haddii aad qabto waxoogaa unugyo aan caadi ahayn, qaybta dheecaankaaga waxaa laga baarayaa nooca fayuuska human papillomavirus (HPV) ee keeni kara kansarka xubinta taranka dumarka.

Haddii aadan qabin wax cudurka HPV ah, waxaad qabtaa khatar hoosaysa ee qaaditaanka kansarka xubinta taranka dumarka ka hor baaritaankaaga xiga. Markaa waxaa dib laguugu casuumayaa baaritaan kale ilaa 3 ama 5 sano gudahood taasoo ku xiran da'daada, sida caadiga ah.

Haddii aad qabto cudurka HPV ah, waxaa lagu siinayaa baaritaan kale (lagu magacaabo colposcopy) si loo eego afka minkaaga si aad ah.

### Unugyo aan caadi ahayn oo badan


Wax yar oo dumar ah ayaa laga helaa unugyo aan caadi ahayn oo badan qaybta dheecaankooda. Tani waxaa l agu magacaabaa heer-sare ee dyskaryosis. Haddii aad qabto unugyo aan caadi ahayn oo badan, waxaa lagu siin doonaa baaritaan colposcopy si loo eego afka minkaaga si aad ah.

**Si aad u yar, dumarka waxaa laga heli karaa unugyadooda kansar qaybta dheecaankooda**

Haddii aad hesho maxsuulkan, waxaa lagugu casuumayaa inaad la kulanto dhakhtar-takhasus sida ugu dhaqso badan. Tani waxay ku dhacdaa qiyaastii 1 ee 1,000 haween ah.

**Qaar dumarka ah waxay u baahan yihiin baaritaan xubinta tararnka ah ka hor inta aysan helin maxsuulkooda**

Mararka qaar dumarku waxay u baahan yihiin baaritaankooda in lagu celiyo, sababtoo ah qaybta dheecaanku si fiican uma caddayn. Haddii tani dhacdo, waxaa lagugu casuumayaa inaad hesho baaritaan kale. Tani ku dhacdaa qiyaastii 2 ee ka ah 100 kasta ee baaritaan.



# Waa maxay colposcopy?

Baaritaanka colposcopy waa baaritaan lagu eegayo inta unugyo aan caadi ahayn ku jirta afka minkaaga iyo ilaa sida ay khatar u yihiin. Waxaa caadiyan lagu sameeyaa qaybta bukaan socodka ee cisbitaalka. Dhakhtar takhasus ayaa samaynaya eegid aad ah ee afka minkaaga isagoo isticmaalaya muraayado soo jiidasho leh (magnifying lens) iyo iftiin (lagu magacaabo colposcope). Waxay qaadi karaan qayb dheecaan yar (a biopsy) si loo eego meelaha afka minkaaga ee u muuqan kara waxaan caadi ahayn. Haddii unugyada aan caadiga ahayn ay aad u daran yihiin, waxaad u baahan kartaa daawayn lagu baabi'inayo unugyada. Tani waxay caawinaysaa ka hortagidda kansarka xubinta taranka dumarka.

## Maxsuullada Colposcopy

### Baaritaankaaga colposcopy wuxuu tusin karaa inaad qabto unugyo aan caadi ahayn kuwaasoo ay tahay in la baabi'iyo

Haddii lagaa helo unugyo aan caadi ahayn oo daran, kuwaan waa la saari karaa. Tani waxaa sidoo kale caadiyan la sameeyaa waqtiga baaritaanka colposcopy, ee qaybta bukaan-socodka cisbitaalka.

Qiyaastii kala bar dumarka lagu sameeyo baaritaanka colposcopy waxaa laga helaa unugyo aan caadi ahayn oo ay tahay in la saaro.

### Baaritaankaaga colposcopy wuxuu tusin karaa inaad qabto kansar

In aad u yar, dumarka waxaa lagaga baaraa kansar baaritaan ahaan. Kansarka lagu eego iyadoo baaritaanka la marayo waxay u badan tahay in la helo wejiga ugu horreeyaba. Dumarka laga helo wejiga hore kansarka xubinta taranka dumarka waxay u badan yihiin inay sii noolaadaan marka loo eego dumarka laga helo wejiga dambe ee kansarada.

# Samaynta doorasho – faa'iidooyinka iyo khataraha macquulka ah ee baaritaanka xubinta taranka dumarka

Waa adiga doorashadaada haddii aad samaynayso iyo haddii kaleba baaritaanka xubinta taranka dumarka. Waxaa jira sababo badan ee sababaha dumarku u go'aansadaan haddii ay samaynayaan iyo haddii kaleba baaritaanka. Si lagaaga caawiyo go'aan qaadashada, waxaan soo raacinay macluumaad ku saabsan faa'iidooyinka iyo khasaarooyinka macquulka ah.

## Waa maxay faa'iidooyinka baaritaanka xubinta taranka dumarka?

Baaritaanka xubinta taranka dumarka waxay caawinaysaa ka hortagga kansarka xubinta taranka dumarka. Waxay ka joojinaysaa qiyaastii 1 dumar ah inay qaado kansarka xubinta taranka dumarka ee 100 kasta ee dumar ah ee sameeya baaritaanka.

Baaritaanka xubinta taranka dumarka waxay ka badbaadisaa in ku dhow 5,000 nafood sannadkii ee waddanka Ingiriiska.

## Waa maxay khataraha baaritaanka xubinta taranka dumarka?

Khataraha baaritaanka xubinta taranka dumarka waxay ka yimaadaan saaridda unugyada aan caadiga ahayn waqtiga baaritaanka colposcopy ee kama yimaadaan baaritaanka laftigiisa. Saaridda unugyada aan caadiga ahayn waxay mararka qaarkood keeni kartaa dhiigbax ama cudur, iyadoo saamayn kartaa mustaqbalka uur-qaadida. Dumarka uur qaada kaddib saaridda unugyada aan caadiga ahayn waxay wax yar u badan tahay inay helaan ilmahooda 1 ilaa 2 bilood ka hor waqtiga caadiga ah.

Dumar kasta oo laga saaray unugyada aan caadiga ahayn ma ku samaysmaan kansarka xubinta taranka dumarka. Laakiin qof kasta oo leh unugyo aan caadi ahayn waxaa la siiyaa daawayn saaritaan ah sababtoo ah macquul ma ahan in la sheego qofka qaadaya kansarka xubinta taranka dumarka.

# Waa maxay calaamadaha kansarka xubinta taranka dumarka?

Kansarku wuxuu samaysmi karaa inta u dhaxaysa baaritaanadaada caadiga ah.

Markaa waa muhiim inaad iska ilaaliso wax kasta oo aan caadi kuu ahayn, gaar ahaan kuwaan soo socda:

- Dhiig-bax inta u dhaxaysa waqtiyada dhiiggaaga caadada, galmo kaddib, ama kaddib menopause.
- Dhuunta galmada oo dheecaan ka yimaado.
- Xanuun ama ka-helid-la'aan waqtiga galmada.

Haddii mid ka mid ah isbedelladaan aad hesho, la kulan dhakhtar sida ugu dhaqso badan. Ha sugin ballantaada xigta ee baaritaanka xubinta taranka dumarka.

Caadiyan calaamadahan macnahoodu ma ahan inaad kansar qabto, laakiin haddii lagaa helo kansar, in la baaro lana daaweeyo wejiga hore macnaheedu waa inay u badan tahay inaad badbaado.

## Maxaa saamaynaya fursadahayga inuu igu dhaco kansarka xubinta taranka dumarka?

Inaad heso baaritaanka xubinta taranka dumarka waxay yaraynaysaa fursadahaaga helitaanka kansarka xubinta taranka dumarka.

Inta badan dhammaan kiisaska kansarka xubinta taranka dumarka waxaa sababa cudurka fayruuska HPV. Fayruuska HPV waxaa la isugu gudbin karaa nooc kasta ee hawl galmo ah ee lala yeesho nin ama naag.

Dumarka iyo ragga la sameeyay galmo lammaanayaal badan waxay u badan tahay inuu ku dhaco fayruuska cudurka HPV. Laakiin fayruuska HPV waa caadi in inta badan dadka ay qaadaan fayruuska waqti noloshooda ka mid ah.

Fayruuska HPV waxaa laga helaa maqaarka ku wareegsan dhammaan goobta taranka, iyadoo lagu faafin karo nooc kasta oo hawl galmo ah. Tani macnaheedu waa in kondoomku aysan mar kasta kaa difaacin inaad qaado fayruuska HPV.

Sigaar-cabistu waxay kordhisaa khatarta kansarka xubinta taranka dumarka sababtoo ah waxay Ku adkaysaa in jirkaagu iska saaro fayruuska HPV.

Gabdhaha da'doodu tahay 12 ilaa 13 ayaa hadda la siiyaa tallaal ka difaacaya ayaga noocyada fayruuska HPV ee keena kansarka xubinta taranka dumarka.

## Maxaa ku dhacaya qaybta dheecaankayga kaddib baaritaanka?

Baaritaanka qaybta dheecaankaaga waxaa lagu xafidayaa shaybaarka ugu yaraan 10 sano. Maxsuulkaaga sidoo kale waxaa lagu xafidayaa nidaam kombuyuutar ammaan ah ee qaran si hay'adda NHS ay isugu barbar dhigi karto maxsuulladaadii ugu dambeeyay iyo kuwaagii hore. Maxsuulladaada waxaa eegi kara shaqaalaha ka shaqeeya meelo kale ee adeegga caafimaadka, si ay u hubiyaan in adeeggu u yahay sida ugu fiican ee ugu macquulsan iyo hagaajinka xirfadaha shaqaalaha takhasuska ah.

# Yaan kala xiriirayaa haddii aan qabo su'aalo?

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan baaritaanka xubinta taranka dumarka, waxaad kala hadli kartaa dhakhtarkaaga (GP), kalkaaliyaha caafimaad ama qaybta ka hortagga dhalmada. Waxaa jira macluumaad aad u faahfaahsan ee ku saabsan baaritaanka xubinta taranka dumarka, ay ku jiraan isha caddaymaha loo isticmaalay macluumaad-sidahan ee boggaga internet-ka soo socda:

The NHS Cervical Screening Programme
**www.cancerscreening.nhs.uk/cervical**

Informed Choice about Cancer Screening
**www.informedchoiceaboutcancerscreening.org**

Waxaad sidoo kale ka helaysaa boggaga internet-ka soo socda ee hay'adaha samafalka macluumaad waxtar leh ee ku saabsan baaritaanka xubinta taranka dumarka:

Cancer Research UK
**www.cruk.org**

Jo's Cervical Cancer Trust
**www.jostrust.org.uk**

Healthtalkonline
**www.healthtalkonline.org**

The Information Standard
Certified member

Crystal Mark
20959
Clarity approved by
Plain English Campaign

55

Macluumaad-sidaha waxaa sameeyay Informed Choice iyagoo ka sameeyey Cancer Screening – oo ah koox madax-bannaan ee quburada macluumaadka ee King's Health Partners, ay ka heleen talo iyo qoraal caawin hay'adda Cancer Research UK iyo wax ku darid qaababka isku-xirka daayagaraamada ee Jo's Cervical Cancer Trust.

La mariyay wada-tashi dadwayne, in ka badan 1,000 xubnood oo dadwaynaha ah ay ku kordhisay tsamaynta qaabaynta macluumaadka ku saabsan NHS Cancer Screening Programmes.

Hay'adahan soo socda ayaa caawiyay wada-tashiga. Beating Bowel Cancer, BME Cancer Communities, Bowel Cancer UK, Breakthrough Breast Cancer, Breast Cancer Campaign, Breast Cancer Care, Cancer Research UK, Independent Cancer Patients' Voice, Jo's Cervical Cancer Trust and the Patient Information Forum.

**www.informedchoiceaboutcancerscreening.org**

Waxaa maalgeliyay NHS Cancer Screening Programmes.

NHS Cancer Screening Programmes waxaa hawlgaliyay Public Health England.

CANCER RESEARCH UK

Informed Choice about Cancer Screening

Waxaa qaabeeyay feltonworks.com

Sebteember 2013. Taariikhda dib-u-eegidda ugu dambayn Sebteember 2015.
2901195 1p 1.6mill July 13 (ANT)

Haddii aad u baahantahay nuqulo dheeri ah ee cinwaankan waxaad booqataa www.orderline.dh.gov kaddib sheeg koodka xxxxxxx ama la xiriir DH Publications Orderline. Teleefoon: 0300 123 1002; Minicom: 0300 123 1003

KING'S HEALTH PARTNERS

An Academic Health Sciences Centre for London

Pioneering better health for all